DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA الجريدة الرسمية RASMIGA

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

Faafintabilwalbasoobaxda جريدة الشهرية

*QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland*

QiimuhuwaaSh.So 10,000 rukunwalba .SanadkiiwaaSh.So 170,000 dalkagudihiisa, dalkadibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyaywuxuu ka bilawdaa 1-da January. QiimahaqoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yarwaaSh.So 3,000, rukunkaiyoqoritaankawaxaa la waydiistaaqeybtamaamulkaFaafintarasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaaxafiiskacanshuurahabarrigaeewasaaraddamaaliyadda.

---

**TUSMADA**

**QaybtaKoowaad**
**AnsixintaXeerkailaalintaQaxootigapuntland.**

**Qaybtalabaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**
**QeybtaSaddexaad**
**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**
**Waxba ma leh**

*Xeer LR .6. ee 19/8/2017, kunasaabsanansixintaXeerkailaalintaqaxootigapuntland.*

Dawladda Puntland eeSomaliya | Puntland State of Somalia

Xeerka Lr.6. ee20/8/2017,kuna saabsan an sixintaXeerka ilaalinta qaxootiga puntland.

Madaxweynuhu,

Markuuarkay: DastuurkaDawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuuarkay: AnsixintaGolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/89/2017 Garowe,Arbaca. Date:16/o8/2017;

Markuutixgeliyey: Muhiimaddaxeerkani u leeyahayDawladda Puntland.

## Wuxuusoosaaray

Xeerkansoosocda:

### Qodobka 1-aad

GolahaWakiiladuwaxayansixiyeenXeerkailaalintaqaxootigapuntland.

### Qodobka 2-aad

Nuquladaasalka ah (Original) waxaalagu kala keydinayaa XafiiskaMadaxweynaha, XafiiskaXoghayahaGuudee BaarlamaankaiyoXafiiskaGaryaqaankaGuudee DPL.

### Qodobka 3-aad

DhaqangalkaXeerkaniwuxuunoqonayaamarka Madaxweynuhusaxiixo, lagunasoosaarofaafintarasmiga ah ee DawladdaPuntland..

Prof Cabdiwelimaxamad Cali Gaas.
MadaxweynahaDawladdapuntland.

DAWLADDA PUNTLAND | | ولاية بو نت لاند الصومال
EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA | | مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 89 / 2017 Garoowe, Arbaca Date:- 16/ 08 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka ilaalinta Qaxootiga Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Dastuurka DPL Qodobka 64-aad Faqrada 1-aad. |
| MARKUU ARKAY: | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/97/2017 ee March, 2/2017,** kuna saabsan Ansixin Xeer. |
| MARKUU DHEGEYSTAY: | Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 20-aad ee 07/08/2017. Xeerka Ilaalinta Qaxootiga Puntland. |

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka ilaalinta Qaxootiga Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Tell:- +252 90 7799977, Email: hashi7999@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com. www.puntlandparliament.net

Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed

Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga

# XEERKA ILAALINTA QAXOOTIGA PUNTLAND

August/2017

GAROWE, PUNTLAND

Tusmo

Cover Page ....................................................................................................................................1

Tusmo:- ...........................................................................................................................................2,3

Hordhac ...........................................................................................................................................4,5

Qodobka 1: (Cinwaan gaaban, baaxad iyo dhaqangelid) ..................................................6

Qodobka 2: (Fasiraad) .......................................................................................................................6

Qodobka3: (Macnaha Qaxooti)........................................................................................................7

Qodobka 4: ((Baaq Aqoonsi wadareed qaxooti (prima facie refugee).....................................7

Qaybta II: Mabaadi' Guud ...................................................................................................................8

Qodobka 5: (Takoor-la'aan)..................................................................................................................8

Qodobka 6: (Qarsoodi iyo gaarnimo)................................................................................................8

Qodobka 7: (Reebanaanta Cayrinta "non-refoulement")..............................................................9

Qodobka 8: (Ka soo reebid)..................................................................................................................9

Qaybta III: Codsi "Meekhaan" Qaxootinimo ......................................................................................9

Qodobka 9: (Aqoonsi Qaxooti) ...........................................................................................................9

Qodobka 10: (Uqalmidli'da xaalad qaxooti)....................................................................................11

Qodobka 11: (Racfaan ku socota Guddiga Racfaanka).................................................................12

Qodobka 12: (Racfaan ku socda Maxakamada Sare) ....................................................................12

Qodobka 13: (Bixin oggolaansho)....................................................................................................12

Qodobka 14: (Socdaale Sharci ah)....................................................................................................13

Qodobka 15: (Joogsiga meekhaanka qaxooti).................................................................................13

Qodobka 16: (Kala noqosho meekhaan qaxooti) ..........................................................................14

Qodobka 17: Maamulka Qaxootiga...................................................................................................14

Qodobka 18: Waaxda Arrimaha Qaxootiga .......................................................................................14

Qodobka 19: (Magacaabidda iyo marag-aqooneedka Agaasimaha)...........................................15

Qodobka 20: (Waajibaadka (xilalka) Agaasimaha) ........................................................................15

Qodobka 21: (Hawlwadeenno)...........................................................................................................16

Qodobka 22: (Yagleelidda Xerooyinka) ............................................................................................17

Qodobka 23: (Guddiga Aqoonsiga) ...................................................................................................17

Qodobka 24: Shaqooyinka Guddiga Aqoonsiga................................................................................18

Qaybta VI: Guddiga Racfaanka ..........................................................................................................18

Qodobka 25: (Yagleelidda Guddiga Racfaanka)....18
Qodobka 26: Xubinnimada iyo Muddada Xafiiska....19
Qodobka 27: (Jago ka Bannaan Xafiis Xubin)....19
Qodobka 28: (shirarka, tirada ansaxa, iyo go'aamada)....20
Qodobka 29: (Xeerar Hoosaadka Guddiga)....20
Marka laga reebo waxa xeerku si cad u sheegay, Guddigu iyagaa u nidaamin doona ambaqaadkooda hadba siday habooni u arkaan....20
Qodobka 30: (Xuquuqda Guud iyo Ballamo-fulinta Qaxootiga....20
Qodobka 31: (Xaashida Aqoonsi Sugidda)....21
Qodobka 32: (Shaqaalayn)....21
Qodobka 33: (Waxbarasho)....21
Qodobka 34: (Dardaaran)....21
Qodobka 35: (Xalka-waara)....22
Qodobka 36: (Meelkadhacyada/Denbiyo)....22
Qodobka 37: (Nidaamyada)....23
Qododbka 38: (Burin)....23
Qodobka 39: (Dhaqangalka)....23

## HORDHAC

**KA BAARAAN DEGSAN** inuu adduunku haatan marayo isusocod dad oo aad u ballaaran oo ugu wacan dagaalo, abaaro iyo barakac,

**AQOONSANAYA** goobta istiraatiijiga ee Puntland ka dhacdo Geeska Afrika marka loo eego dawladdaha deriska ah iyo Badda Carbeed,

**AQOONSANAYA** in dadka reer Puntland ay ka marag kacayaan qalaanqallo siyaasadeed oo isa soo taraya oo ka jira deriskooda,

**GARWAAQSANAYA** in dhulka ay ka taliso dawlada Puntland ee Soomaaliyeed ay soo gaareen tiro isa soo taraysa oo magangelyo raadis ah iyadoo dabajoogta qalalaasooyin siyaasadeed oo ka dhex jirey dalalka deriska la ah laga soo bilaabo dabayaaqadii 1991, oo ay ka daba timid qulqul socdaallo reer Itoobiya oo isku dhexjir ah, kuwaasoo u jeexaya Yemen iyo hirarkii qaxooti oo u dambeeyey kana dhashay shaqaaqooyinkii Yemen ka dhacay 2015,

**KU BARAARUGSAN** baahida degdegga si ay xukuumadda Puntland feejignaanteeda ugu jeediso dhinaca qaxootiga iyo arrimaha magangelyo doonka isla markaasna u raadiso qaxootiga xal bini'aadannimo iyo mid xeer,

**KU BARAARUGSAN** ujeeddooyinka shareecada Islaamka, oo ah asaas horaadka haykalka sharciyeed ee Puntland, iyo qiyamka bulshada Soomaaliyeed,

**KU HAWLGELAYNA** erayada iyo ruuxda Dastuurka Dawladda Puntland iyo Dastuurka kumeel gaarka ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliyeed, kuwaasoo sii xoojinaya mabaadi'da xuquuqul aadanaha, sinnaanta, iyo aqoonsiga qaxootiga magangelayo doonka iyo ilaalin qaxootiga,

**GARWAAQSANAYA** dikreetadii Madaxweynihii Xukuumadda hore ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaliyeed uu ka soo saaray Qaxootiga 1984,

**OGSOON** inay Soomaaliya ku biirtay Axdigii (heshiiskii) 1951 kaasoo la xiriirey meekhaanka (xaalada) Qaxootiga, iyo borotokooladii 1967 iyo 1978 (taasoo halkaan iyagoo wada jira loogu yeerayo "Axdigii 1951" isla markaasna ay saxiixday Axdigii Ururka Midowga Afrika (OAU) 1969 oo ahaa xukumida Dhinacyo astaysan ee Shiddooyinka Qaxootiga (kaasoo halkan loogu yeerayo "Axdigii OAU",

**KU QABWEYN** in dadweynaha reer Puntland kaalmadooda Qaxootiga iyo magangelyo doonka ku nool Puntland loo arkay cunsur muhiim u ah ku gargaarida qaxootiga inay ku noolaadaan xasillooni iyo dareen soo dhoweyn Puntland dhexdeeda.

**KABAARAANDEGNEY** gebi ahaan nuxurka iyo erayada hordhaca iyo walxaha ku jira qodobadeeda,

**SIDAA DARTEED**, hadda, Barlamaanka Puntland wuxuu halkan ku soo saarayaa Xeerka Ilaalinta Qaxootiga si uu u xukmiyo aqoonsiga, ilaalinta, iyo maamulka walxaha la xiriira qaxootiga iyo ujeedooyinka kale oo ku dabran, isla markaasna uu hirgeliyo siyaasadda dawladda ee ku aadan arrimaha qaxootiga, uguna hoggaamiyo hayadaha dawladda ambaqaadka maamulka qaxootiga, sida soo socota,

# Qaybta I: Fasiraad

## Qodobka 1-aad

### Cinwaan gaaban, baaxad iyo dhaqangelid

1. Xeerkan waxaa loogu yeerayaa Xeerka Ilaalinta Qaxootiga.
2. Wuxuu ka dhaqan gelayaa dhammaan dhulka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
3. Wuxuu dhaqangal noqon doonaa isla marka Madaxweynaha Puntland saxiixo iyo isla taariikhda daabacadiisu ku soo baxdo Faafinta Rasmiga ah.

## Qodobka 2-aad

### Fasiraad

Xeerkan dhexdiisa hadduusan nuxurku wax kale doonayn (keenayn):

**"Magangelyo"** waxaa loola jeedaa ilaalin ay xukuumadu siiso dad qaxootinimo u qalma sida waafaqsan qodobada Xeerkan iyo Axdiyada caalamiga ee la xiriira arrimaha Qaxootiga, oo ay ku jiraan Axdiga 1951 iyo Axdiga OAU 1969;

**"Magangelyo-doone"** waxaa loola jeedaa qof raadinaya aqoonsi qaxootinimo sida waafaqsan qodobada Xeerkan;

**"Sarkaal loo Igmaday"** waxaa loola jeedaa sarkaal kasta ama koox saraakiil ah oo loo igmaday awoodda diiwaangelinta codsadaha, go'aan ka gaarista u qalmid qaxootinimo si waafaqsan qodobada Xeerkan, iyo inuu ku hawlgalo xilal kale oo la mid ah hadba sida uu faray Agaasimuhu;

**"Dalka Asalka (askunka)"** waxaa loola jeedaa dalka ama dalal uu Qofi ka haysto jinsiyad;

**"Agaasime"** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda arrimaha Qaxootiga oo hoos u imaanaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**"Ku-Tiirsane"** waxaa loola jeedaa qofkii si mug leh ugu tiirsan qof qaxooti ah ama magangelyo doon ah si uu uga helo baahida caadiga ah ee nolosha xaalada qofkaas ku haboon;

**"Guddiga Aqoonsiga"** waxaa loola jeedaa guddi aqoonsi oo lagu asaasay soona hoosgelaya Qaybta V;

**"Deganaansho caadi ah"** waxaa loola jeedaa dalka ay qaxootigu deganaayeen halkaasoo halkaas oo hadii lagu celiyo uu kala kulmay dhibaato ama ka baqayo cadaadis;

**"Kaarka Aqoonsi Sugidda"** waxaa loola jeedaa xaashida la siiyey qaxootiga oo soo hoos gelaysa qodobka 16;

**"Xubin qoyska qaxootiga"** waxaa loola jeedaa:-

a) Lamaane kasta ama lamaaneyaasha qaxootiga

b) Kutiirsane walba ee carruur, walaal (gabar, wiil), awoowe/ayeeyo, waalid, ilmo-ilmohood (gradchild), ama qof weli gacanta lagu hayo (ward) oo qof qaxooti ah guri kula nool;

c) Qof kasta oo naafo ah oo daryeelida qof qaxooti ah ku jira, ha gaaro ama yuusan gaarin da`da 15 sanadood;

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Puntland

**"Puntland"** waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed, ama dhulka Puntland, hadba sida biya dhucu u baahdo;

**"Qaxooti"** waxaa loola jeedaa qaxooti la aqoonsaday si waafaqsan qodobada Qaybta III;

**"Guddiga Racfaanka"** waxaa loola jeedaa guddiga rafcaanka ee lagu asaasay sida soo hoosgelaysa Qaybta IV;

**"Waaxda Arrimaha Qaxootiga"** waxaa loola jeedaa waaxda arrimaha qaxootiga ee soo hoos gelaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha laguna asaasay Qodobka 18;

**"Xero Qaxooti"** waxaa loola jeedaa goob kasta oo uu Wasiirku u asteeyo xero qaxooti sida soo hoosgelaysa Qodobka 22;

**"UNHCR"** waxaa loola jeedaaHay'adda Qaxootiga Aduunka;

## Qodobka 3-aad

## Macnaha Qaxooti

1.Qof waxaa loo aqoonsan doonaa Qaxooti ujeedka xeerkan dartiis, haddii qofku-

b) Iyadoo ay ugu wacan tahay cabsi xiddido adag haysata oo ah in dhibaato loogu geysto sababo la xiriira isir, diin, jinsi (sex), jinsiyad, xubinnimo koox gaar ah ama fikir siyaasadeed, ayuu dibedda uga baxay dalkii uu jinsiyaddiisa lahaa, mana karayo, ama cabsidaas darteed ma doonayo inuu ilaalin ka helo dalkaas; ama mid aan lahayn jinsiyad oo ciribta dhacdooyinkaas dartood dibedda uga maqan dalkii uu deganaasho caadi ah ku lahaa, aan karayn, ama iyadoo ay ugu wacan tahay cabsidaas oo kale aan doonayn inuu ku laabto; ama

t) Iyadoo ay ugu wacan tahay duullaan dibedda ah, qabsasho, gacan sarrayn shisheeye, ama dhacdooyin si aad u halis badan u walaaqaya kala dambaynta guud ee qaybo ka mid ah ama dhammaanba dalka asalka (askunka) ama dhalashada, laguna dirqiyey inuu ka tago meeshu deganaanshaha caadiga ku lahaa, si uu uga raadsado qaxooti meel ka baxsan dalkiisa asalka (askunka):

2. Hadday jirto xaalad qof kaasoo leh dhawr jinsiyadood, erayga (dalka asalka-askunka) waxaa loola jeedaa dal walba oo uu jinsiyad ku leeyahay, qofkana looma qaadan doono inuusan ilaalin ka haysan waddanka uu jinsadiisa haysto, haddii isagoon haysan sababo sax ah oo ku aadan cabsi xidido adag ku fadhida, uusan ka faa'iidaysan ilaalinta dal ka mid ah dalalka uu jinsiyadooda haysto;

## Qodobka 4-aad

## Baaq Aqoonsi wadareed qaxooti (*prima facie* refugee)

1. Wasiirku, wuxuu hadii ay caddaaato in koox dad ah ay u qalmeen inay noqdaan qaxooti sida soo hoos gelaya qodobka 3aad ee xeerkan, ku baaqi karaa in dadkaas kooxda ah ay heleen *Aqoonsi Wadareed* qaxooti ama baaq kale oo la mid ah sida uu tilmaamay nidaamku;

2. Wasiirku wuxuu dadaal u gelayaa samaynta baaq soo hoos gelaya qodobka 4(1) loona faafiyey qaab kasta oo sida ugu fiican u hubinaya in baaqaasi helo feejignaanta saraakiisha loo igmaday iyo dadka uu la xiriiro, lagana yaabo in wakhti walba, uu baaqaasi noqon karo mid loo buriyo qaab la mid ah;

3. Haddii wasiirku ciday noqotaba si mug leh uga reebo ama uu ka saaro baaqa la sameeyey sida ku xusan qodob hoosaadka 4(1), saaritaankaas ama reebiddaas uma diidi doonto ciddaas ay khusayso inay soo codsadaan aqoonsiga meekhaankooda qaxooti sida soo hoos gelaysa qodob hoosaadka 3(1) ama (2);

## Qaybta II: Mabaadi' Guud

### Qodobka 5-aad

### Takoor-la'aan

1. Xeerkan ayaa la dhaqangelin doonaa iyadoo aan cidna loogu takoorayn isir, diin, qabiil, jinsiyad, xubinnimo koox gaar ah oo aan ku caan bixin gelid falal-dambiyeed sida argagixisada, ama fikir siyaasadeed;

2. Ilaalinta iyo u gargaaridda qaxootiga waa in loo bixiyo iyadoo aysan jirin wax takoor ah sida lagu caddeeyey qodob hoosaadka 5(1);

### Qodobka 6-aad

### Qarsoodi iyo gaarnimo

1. Qofna dibedda kagama warrami karo xog uu ku helay xeerkan dartiis marka laga reebo;

   b) Si xeerkan waafaqsan; ama

   t) Marka la helo qoraal oggolaansho ee Wasiirka ama Agaasimaha; ama

   j) Marka laga helo qoraal oggolaansho cidda xogtu khusayso;

2. Wasiirku qof ayuu u awood siin karaa isagoo la tashanaya Agaasimaha inuu helo ama soo gurubsado xog lagu soo ururiyey foomka la dejiyey;

3. Ma jirayo qof, kaa soo hela ama soo gurubsada xog inta uu ku gudo jiro waajibaadkiisa si waafaqsan xeerkan oo dibedda ugu soo saari doona ama ku faafin doona xogtaas la sheegay qof ama cid kale oo Wasiirku uusan awood u siin inay helaan xogtaas.

4. Qodobabada qarsoodiga iyo u gaaryeelidu waxay dhaqangal ku noqonayaan xogtaan soo socota:

   b) Diiwaanada xog ururinta, qoraalada shirarka iyo warbixinada Guddiga Aqoonsiga;

   t) Diiwaanada xog ururinta, qoraalada shirarka iyo warbixinada Guddiga Racfaanka;

   j) Foomamka, galalka iyo sawirada magangelyo-doonka iyo qaxootiga;

   x) Wixii waraaqo kale ah oo la xiriira Magangelyo-doonka ama Qaxootiga;

5. Wasiirku wuxuu soo saari doonaa nidaam ahaan habraacyo si loo dhawro qarsoodiga iyo gaar yeelidda iyadoo la raacaayo sharcigan;

6. Qofkii jebiya qodob-hoosaad walba ee Qodobkan wuxuu galayaa dembi marka qiraal dhacona wuxuu muteysanayaa ciqaab sida lagu qeexay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 7-aad

## Reebanaanta Cayrinta "non-refoulement")

1. Ma jirayo qof laga hor istaagi doono soo gelidda Puntland ama laga masaafurin doono Puntland ama loo celin doono dal kasta oo kale ama lagula dhaqmi doono fal la mid haddii ciribta diidmadaas, cayrintaas ama celintaas ama fal kasta oo kale oo qofkaas lagu dirqiyey inuu ku noqdo dal halkaasoo:-

    b) uu halis ugu jiri karo in la dhibaateeyo ama loo jirdilo sababo la xiriira isirkiisa, qabiilkiisa, diintiisa, jinsiyadiisa, xubinnimo koox bulsho oo gaar ah ama fikiriisa siyaasadeed ama

    t) Noloshiisa, sharaftiisa muuqda ama xorriyaddiisa lagu halis gelinayo sababo la xiriira duullaan ka yimid dibadda, qabsasho, gacan sarreyn shisheeye, ama dhacdooyin si halisi ku jirto u qasaya kala dambaynta guud, qayb ama dalka dhammaantiis.

## Qodobka 8-aad

## Ka soo reebid

1. Haddii wasiirku u arko cayrintu inay lagama maarmaant tahay, ama loo rabo danta amniga qaranka Puntland iyo kala dambaynta guud, Wasiirku wuxuu u gudbinayaa qoraal codsi ah oo ay weheliso caddaymo ku filan Maxkamada Sare si looga cayriyo Puntland qaxooti ama magangelyo doon.

2. Marka laga soo reebo meesha ay asbaabo dirqinaya amniga qaranku si kale u rabaan, qofka qaxootiga ama magangelyo doonku waxaa loo oggolaan doonaa inuu soo gudbiyo caddaymo uu ku furan karo naftiisa, iyo inuu iska difaaco ama cid wakiisho Maxkamadda Sare horteeda ujeedkaa dartiis.

3. Qof cayrintiisa loo faray sida soo hoos gelaysa Qodobkan waxaa lagu xiri karaa ama lagu hayn karaa amar Maxkamadda Sare haduu xariggaasi lagama maarmaan u yahay ujeeddo saamayn ku leh amarka cayriskiisa ama si loo hubiyo inuusan qofkaasi halis u gelin amniga ama kala dambaynta guud ee Puntland inta cayriskiisu dhiman yahay.

## Qaybta III: Codsi "Meekhaan" Qaxootinimo

## Qodobka 9-aad

## Aqoonsi Qaxooti

1. Qof walba oo ku soo galay Puntland, ha noqoto si sharci ah ama si kale, kaasoo raba inuu ugu negaado Puntland Qaxootinimo, sida ku xusan Xeerkan waxa uu ujeedkiisa kahor caddaynaa qof ahaan Sarkaalka la Igmaday ee Waaxda Arrimaha Qaxootiga isla marka uu soo galo ama si kastaba xaaladi ha noqotee soddon beri gudohood markuu dalka soo galay.

2. Ka sokow qodob hoosaadka 9 (1), Sarkaalka la Igmaday wuu qaban karaa codsi marka ay dhammaato 30 beri haddii codsaduhu muujiyo sababo lagu qanci karo oo keenay dib u dhaca codsiga.

3. hadii qof si sharci ah u deggan Puntland gudeheeda, ka dibna aan karayn ama aan doonayn inuu ku noqdo dalkiisa asalka (askunka) ama goobta deganaashihiisa caadiga sababo kasta sida ku xusan Qodobka 3, wuxuu, ka hor dhicitaanka joogitaankiisa sharciga ah, hortegayaa Sarkaalka loo Igmaday ee Waaxda Arrimaha Qaxootiga isla markaasana wuxuu codsanayaa in loo aqoonsado qaxooti si waafaqsan qodobada xeerkan.

4. Iyada oo aan la baal marin qodobada ku xusan qaybtan, ma jirayo qof qaxooti ku sheeganaya macnaha ku dhexjira Qodobka 3, oo keliya sababo soo gelitaan aan sharci ahayn dartood loogu baaqo socdaale reeban (aan la aqbali Karin), loo xiray ama si uun loo ganaaxay, marka laga reebo sida ku xusan Qodobka 36

5. Marka la codsanayo "meekhaan" qaxooti,

b) Codsaduhu wuxuu u buuxinayaa foomka codsiga sida uu tilmaamay nidaamku, haddana codsiga waxaa diiwaangelin doona Sarkaalka loo Igmaday ee ka hawlgala goobta barta soo gelitaanka Puntland

t) Sarkaalka loo Igmaday wuxuu waraysanayaa codsadaha isagoo qoraal ka dhigaya. Cadaynta qoraalka ayaa loo akhrinayaa codsadaha, kaasoo sixi kara ka hor intaysan wada saxiixin Sarkaalka waraysanaya iyo codsaduhu labaduba. Haddii uu codsaduhu uusan jeclaysan inuu saxiixo caddaynta qoraalka, sababta uu uga maagey ayaa la tilmaami doonaa.

j) Hadday xaaladu tahay dumar magangelyo doon ah, Sarkaalka loo Igmaday wuxuu samaynayaa qabanqaabinta warayste dumar ah iyo turjumaan dumar ah, hadba baahida, si loo qaado waraysiga,

x) Hadday xaaladu tahay carruur aan lala socon oo la soo soocay iyo dad dhimirka ka naafaysan, Sarkaalka loo Igmaday wuxuu qabanqaabin doonaa wakiillo sharci oo leh marag aqooneed ku haboon, codsadahana u kharash la' si ay ugu gargaaraan inay soo bandhigaan sheegashadooda magangleyo

kh)Sarkaalka loo Igmaday sida ugu dhakhsaha badan ayuu ugu gudbinayaa Agaasimaha qaababka codsigooda , hawraarohooda, cadaymohooda qoraal, ama marag taageeraya;

d) Agaasimuhu marka uu qabto codsiga wuxuu sidoo kale soo hordhigayaa Guddiga

Aqoonsiga,

r) Agaasimuhu wuxuu hubin doonaa in Guddiga Aqoonsiga inuu ka fariisto, kana

baaraandego codsiga lixdan beri gudohood oo ka bilaabanaysa taariikhda codsiga,

s) Wasiirku, sababo la garowsan karo awgood, waxaa uu fidin karaa muddada lagu tilmaamay qodobka 9(1)(s) lixdan maalmood oo dheeraad ah.

6. Iyada oo aan la baal marin shuruudahaas si loo helo hannaan caddaalad iyo garsoor oo go'aan laga gaaro meekhaanada qaxootinimo, Waaxda Arrimaha Qaxootigu waxay hab socod degdegsiiyo leh wax uga qabanaysaa codsiyada u baahan feejignaan degdeg ah, si waafaqsan hanaanada la tilmaamay ee soo hoosgelaya Xeerkan.

7. Waaxda Arrimaha Qaxootigu waxay soo dedejin doonta hannaanada ku aadan codsiyada ay leeyihiin:

   b) Dadka naafada ah;

   t) Dhibbanayaasha anfariirsan;

   j) Dadka maxbuusan;

   x) Dhibanayaasha la jirdiley

   kh)Dadka nugul; iyo

   d) Carruurta aan cidi wehelin;

8. Qofkii sheegta inuu yahay Qaxooti waa loo oggolaan doonaa inuu soo galo, kuna negaado Puntland inta go'aan laga gaarayo codsigiisa. Waxaana la siin doonaa waraaqo ku haboon oo caddaynaya joogitaankiisa sharciga ah..

9. Ma jirayo qof qaxooti ku sheeganaya macnaha ku dhexjira Qodobka 3, oo keliya sababo soo gelitaan aan sharci ahayn dartood loogu baaqo inuu yahay socdaale reeban (aan la aqbalin), loo xiray ama si uun loo ganaaxay, marka laga reebo sida ku xusan Qodobka 36 inta weli laga dhursugayo baaritaanka codsigiisa ee ku aadan meekhaan qaxooti.

**Qodobka 10-aad**

**U qalmidli'da xaalad Qaxooti**

1. Qofna looma aqoonsanayo Qaxooti Xeerkaan ujeedkiisa hadday jiraa asbaabo halis ah oo loogu eegayo:-

   b) inuu galay denbi ka dhan ah nabadda, dembiyo dagaal ama denbi ka dhan ah bani'aadaminimada sida lagu qeexay qawaaniinta adduunka taasoo ay saxiixday Jamhuuriyadda Soomaaliya, kuwaasoo dabraya Puntland; ama

   t) isagoo galay dembi halis ah oo aan siyaasadaysnayn meel Puntland bannaanka ka ah ka hor soo gelitaankiisa qaxootinimo ee Puntland; ama

   j) wuxuu dembiile ku noqday falal ka dhan ah ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Qaramada Midoobey, Jaamicadda Carabta, ama Midowga Afrika; ama

   x) Haysta hal jinsiyad wax ka badan, aan naftiisa uga faa'iidayn ilaalinta mid ka mid ah dalalka uu jinsiyadooda haysto isla markaana aan haysan sababo maangal ah oo uu sidaa u samayn waayey.

2. Halka uu Guddiga Aqoonsiga uu diido codsi inuu u aqoonsado meekhaan qaxooti, waxay qoraal ku wargelinayaan codsadaha, waxayna ogeysiinayaan sababaha diidmadu salka ku hayso. Xaaladdaas oo kale, codsaduhu wuxuu daw u leeyahay inuu u racfaanto Guddiga Racfaanka Qaxootiga sida waafaqsan qodobada Qaybtan.

## Qodobka 11-aad

## Racfaan ku socota Guddiga Racfaanka

1. Qof walba ama ha noqoto qudhiisa ama wakiil uu leeyahay wuxuu u gudibin karaa racfaan la tixgeliyo Guddiga Racfaanka soddon beri gudohood marka xiriir qoraal oo la xiriira diidmada sheegadiisa meekhaan qaxooti uu ka helo Agaasimaha.

2. Ka sokow qodob hoosaadka 11(1), Guddiga Racfaanka way dhegaysan karaan racfaan la soo diiwaangeliyey kadib marka ay dhammaato 30 beri haddii racfaanluhu muujin karo sabab loogu garaabi karo diiwaangelinta racfaanka dib dhaeday.

3. Dhegaysiga racfaanka sida qodobkani qabo, racfaanluhu wuxuu shakhsiyan ka soo hor muuqan karaa Golaha Qaylo dhaanta ama waxa uu wakiilanayaa garyaqaankiisa isagoo masuuliyadeeda qaadaya.

4. Ka sokow wax hore, Guddiga Racfaanka waxay hadday doonaan baari karaan sheegashooyin soo jiitey feejignaantooda, meesha ay arrintu ka tahay mid khusaysa dadweynaha.

5. Guddiga Racfaanku wuxuu go'aankiisa oo qoraal ah ku wargelin doonaa racfaanlaha 30 beri gudahood.

## Qodobka 12-aad

## Racfaan ku socda Maxakamada Sare

1. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Guddiga Racfaanka wuxuu racfaan u qori karaa Maxkamadda Sare si ay dib u eegis maamul ugu samayso go'aanka.

2. Go'aanka ay goyso Maxkamadda Sare ayaa loo tixgelinayaa mid kama dambays ah.

## Qodobka 13-aad

## Bixin oggolaansho

1. Helidda oggolaanshaha wasiirka, Waaxda Arrimaha Qaxootigu waxay siin kartaa oggolaansho Kutiirsanayaasha Qaxootiga markay soo gudbiyaan codsi soo gelitaan iyo deganaasho Puntland dhexdeeda, Kutiirsanayashuna waxay heli doonaan xuquuqda iyo hibooyinka looga deeqo Qaxootiga muddada ay Qaxootinimada ku joogaan Puntland dhexdeeda.

2. Meesha codsadaha loogu aqoonsaday Qaxooti, xubnaha qoyskiisa oo la socda ama gadaal ku soo biiri doona waxaa loo aqoonsan doonaa Qaxooti, marka laga reebo inay haystaan jinsiyad kale oo ka duwan kan Qaxootiga, ayna ku raaxaysanayaa ilaalinta waddanka ay jinsiyadooda haystaan.

3. Haddii, kadib aqoonsiga Qaxooti ee madaxa qoyska, qoyskiisu uu burburo sababo furriin, kalabax, ama dhimasho, xubnaha qoyskiisa oo horay loogu deeqay meekhaan aqoonsi iyadoo loo cuskaday qodob hoosaadka 13(2) waxaa loo sii aqoonsanayaa qaxooti, marka laga reebo inuu ku dhaqangalo mid ka mid ah shuruudaha Qodobada 15 ama 16.

## Qodobka 14-aad

### Socdaale Sharci ah

Qof kasta oo codsigiisa ah meekhaan qaxootinimo ama magangelyo la soo diido sida waafaqsan Xeerkan, waxaa loo aqoonsanayaa socdaale qaanuuni ah waxaana loola dhaqmayaa si waafaqsan qodobada Xeerarka Socdaalka ee Puntland marka laga reebo in qofkaas gacan ku hayn meekhaan qaxooti ay ugu deeqday UNHCR inta laga sugayo dib u dejin ama u rarid ay ugu samayso UNHCR dal kale.

## Qodobka 15-aad

### Joogsiga meekhaanka qaxooti

1. Qofku wuxuu ka joogsan doonaa inuu ahaado Qaxooti ujeedooyinka Xeerkan dartood haddii qofkaas:-

   b) Si iskiis ah uu dib uga hanto ilaalinta dalka uu jinsayaddiisa haysto; ama

   t) Hadduu si iskiis ah jinsiyaddiisa uu lumiyey dib u hanto,

   j) Uu qaato jinsiyad dal kale, kuna naaloodo ilaalinta dalka leh jinsiyaddiisa cusub; ama

   x) Sii wado diidmadiisa inuu ka faa'iideysto ilaalinta dalka uu jinsayaddiisa haysto kolkay xaaladaha ku dabran oo xiriirka la leh in loo aqoonsado qaxooti uu jiritaankoodu istaago (meesha ka baxo); ama

   kh)Si iskiis ah ugu noqdo dalkii uu ka soo tegey ama dibedda kaga negaadey iyadoo ay ugu wacnayd cabsi in la dhibaateeyo: ama.

   d) Ahaanshihiisa qof aan jinsiyad lahayn wuxuu, xaaladihii xiriirka la lahaa in loo aqoonsado Qaxooti oo jiritaankoodu istaagey awgood, wuxuu awood u leeyahay inuu ku laabto dalkii uu horay deganaasho caadi ah ugu lahaa, marka laga reebo inuusan qodob hoosaadkani ku dhaqan gelayn qof qaxooti ah oo la imaan kara asbaabo khasbi kara kuwaasoo ka soo aloosmaya dhibaatayn hore oo keeni kara inuu diido ku laabashada dalkii uu horay ugu lahaa deganaansho caadi ah; ama.

   r) Wuxuu ka galay meel dibedda ka ah Puntland fal–denbiyeedyo halis ah oo siyaasad ka maran ka dib oggolaanshihiisa qaxootinimo; ama

   s) Wuxuu si halis ah u jebiyey ujeedadii iyo mabaadi'dii Qaramada Midoobey, Jaamicadda Carabta iyo Midowga Afrika.

2. Qodob hoosaadka 1(x), kuma dhaqan geli doono qof Qaxooti ah oo keeni kara asbaabo dirqin kara taasoo ka soo aloosmaysa dhibaatayn hore oo sababaysa diidmada inuu ka faa'iidaysto ilaalinta dalka uu jinsadiisa haysto.

3. Wasiirku wuxuu kala tashan UNHCR ka hor intaan lagaarin go'aan ku aadan joojinta meekhaanka qaxootinimo.

## Qodobka 16-aad

### Kala noqosho meekhaan Qaxooti

1. Haddii xilli kasta Wasiirku arko inay jirto sababo (asaasyo) halis ah oo lagu rumaysto in qof loo aqoonsaday Qaxooti uusan mudnayn in la aqoonsado, ama uu ka joogsaday qaxootinimo, waxaa uu burin karaa meekhaankii qaxooti ee la siiyey ka dib marka uu qoraal ku wargeliyo qofka qaxootiga ah oo ay khusayso, isla markaasna uu siiyo fursad uu ugu sharrixi karo arrintaas.
2. Qofkii xadgudub ka tirsida go'aanka Wasiirka wuxuu u racfaan u qaadan karaa Guddiga Racfaanka soddon beri gudohood markuu soo gaaro go'aanku.
3. Ka sokow qodob hoosaadka 16 (1), Guddiga Racfaanka waxay dhegaysan karaan racfaanka la diiwaangeliyey ka dib markay dhamaato 30 beri haddii racfaanluhu muujin karo sabab garowshiiyo leh oo keentay in racfaanka gadaal laga diiwaangeliyo

# Qaybta IV: Maamulka Arrimaha Qaxootiga

## Qodobka 17-aad

### Maamulka Qaxootiga

Wasaaradda Arrimaha Guduhu waa hay'adda dawladeed oo loo gacan banneeyey masuuliyadda maamulka, dejinta mabaadi'da guud, isu-duwidda iyo korjoogidda maaraynta arimaha la xiriira Magangelyada iyo Qaxootiga Puntland

## Qodobka 18-aad

### Waaxda Arrimaha Qaxootiga

1. Waxaa jira waax foogan oo soo hoosgelaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha loona yaqaan Waaxda Arrimaha Qaxootiga
2. Waaxda Arrimaha Qaxootigu waxay mas'uul ka noqon doontaa dhammaan arrimaha maamulka ee khuseeya qaxootiga ku sugan Puntland gudeheeda, waxayna yeelan doontaa awoodo ay isugu duwdo wax-qabdyada iyo barnaamijyada la xiriirsan qaxootiga oo ay ku jiraan: -

   b) Diiwaangelinta qaxootiga soo hoos gelaya oggolaansho aqoonsi wadareed (*prima facie*) iyo inay habayso codsiyadooda.

   t) Tixgelinta kiisaska magangelyo oo ay soo gudbiyaan Ilaalada Xuduudaha ama Waaxda Socdaalka, una gudbiso Guddiga Aqoonsiga hadba baahida.

   j) Ambaqaado diiwaangelinta dhammaan kiisaska qaxootiga oo ay oggolaadeen Guddiga Aqoonsiga.

   x) Xiriir la samayso codsadayaasha uu Guddiga Aqoonsigu diidey ama oggolaaday.

   kh) Qabato cusboonaysiinta ama kala jaridda si dib loogu eego isla markaana loo soo saaro.

   d) Tixgeliso dibna u eegto codsiyada qoysaska dib ula midoobaya qaxootiga Puntland ku sugan.

r) Tixgeliso isla markaana talo ka siiso Madaxda Wasaaradda codsiyada ka imanaya qaxootiga si ay u dhexgalaan deegaannada Puntland.

s) Isku-duwdo islamarkaasna u kuurgasho dhamaan waxqabadyada ay ku deeqeen hay'adaha qaramada midoobey iyo hay'adaha kale oo ka shaqaynaya caawinta qaxootiga iyo adeega asaasiga ah.

sh) U qareento kor u qaadista ilaalinta iyo xuquuqda qaxootiga.

dh) Maamusho xerooyinka iyo xarumaha diiwaangelinta.

c) Qabato cabashooyinka iyo tabashooyinka qaxootiga;

g) Soo jeediso samaynta siyaasadaha habban si waafaqsan heerbeegyada caalamiga ee arrimaha qaxootiga.

## Qodobka 19-aad

## Magacaabidda iyo marag-aqooneedka Agaasimaha

1. Waxaa jiri doonaa Agaasime Waaxda Arrimaha Qaxootiga kaasoo hoggaamin doona Waaxda.
2. Agaasimaha waxaa soo jeedin doona Wasiirka, isagoo raacayo hannaanka lagu farmuuqay Xeerka Shaqada iyo Shaqaalaaha, waxaana magacaabaya Madaxweynaha Dowladda Puntland.
3. Marag-aqooneedka qofka doonaya jagada agaasimuhu waxaa ku jiri doona laakiin aan ku koobayn:-

    b) haysasho shahaado digrii ah oo ay bixisay jaamicad la aqoonsan yahay

    t) Inuu u leeyahay aqoon isla markaasna haysto waaya-aragnimo arrimaha la xiriira xuquuqda aadanaha, qaanuunka ama leh khibrad shaqo oo la xiriirta arrimaha bini'aadaminimo.

    j) Inuu yahay qof leh dhaqan anshax sare, maamuus iyo dhexdhexaadnimo.

    x) Marna aysan ku caddaan xadgudub denbi ah.

## Qodobka 20-aad

## Waajibaadka (xilalka) Agaasimaha Waaxda Qaxootiga

1. Agaasimuhu wuxuu yeelanaya waajibaadka soo socda:-

    b) Waa madaxa Waaxda Arrimaha Qaxootiga.

    t) Wuxuu isu duwayaa dhammaan arrimaha lagama maarmaanka u ah kor u qaadista daryeelka iyo ilaalinta qaxootiga isla markaana inuu talo siiyo madaxda Wasaaradda.

    j) Inuu hubiyo isagoo la kaashnaya Madaxda Wasaaradda wixii deeq ah ee ka yimaada hay'adaha Qaxootiga Adduunka ee Qaramada Midoobey, hay'adaha dawladda, bixinta agabyo iyo adeegyo ku filan si qaxootigu u helo soo dhoweyn, ilaalin iyo daryeel dhan kasta ah.

x) Kor u qaadista xalka-waara ee qaxootiga.

Kh) Qabto shirarka Guddiga isla markaasna hirgeliyo go'aanada Guddiga.

d) Qabto isla markaasna gudbiyo codsiyada aqoonsiga qaxootinimo.

r) Diiwaangeliyo dhammaan qaxootiga iyo magangelyo doonka.

s) Bixiyo Kaadhadhka Aqoonsiga qaxootiga iyo warqadaha safarada markuu la tashado guddiga aqoonsiga.

Sh) Maamulo xarumaha diiwaangelinta iyo Xerooyinka Qaxootiga.

Dh) Kala taliyo wasiirka daryeelka iyo galladinta qaxootiga iyo dayactirka goobaha lagu martigeliyo/qaabilo qaxootiga.

c) Inuu noqdo afhayeenka Waaxda isla markasna uu Waaxda ku metelo shirarka dibada ah taasoo loo igman karo goor ilaa goor.

g) Bilaabo isagoo la kaashanaya odayaasha dhaqanka wada noolaanshaha xasilloon, gabbaadka iyo adeegyada asaasiga ah ee loo baahan yahay

f) Bilaabo isagoo la kaashanaya hay'adaha horumarinta (development partners), mashaariic sare u qaadaysa wadajirka iyo wada noolaasho xasilloon ee u dhexaysa bulshada martigelisey iyo qaxootiga.

k) Kala taliyo Wasiirka, Wasiirkuna kala taliyo xukuumadda ka soo qaadidda hay'adaha horumarinta lacago si loo galladiyo qaxootiga.

L) Hubiyo adeegsi beekhaansan ee agabka goobaha qaxootiga loo qorsheeyey

m) Waa gacan ku hayaha shaabada Waaxda.

n) Gudanayaa waajibaad walba oo loo diro.

2. Agaasimuhu wuxuu qaadi doonaa tallaaboyin si uu u hubiyo ilaalinta qaxootiga dumarka, qaxootiga carruurta, qaxootiga da'da weyn iyo dadka kale oo leh baahida gaarka, una baahan ilaalin gaar ah.

3. Agaasimuhu, isagoo u gudanaya shaqooyinkiisa kore si dardar leh, ayuu haddana si joogto ah u siin doonaa Agaasimaha Guud si uu ugu gudbiyo Wasiirka warbixinno la xiriira arrimaha qaxootiga.

## Qodobka 21-aad

## Hawlwadeenno

1. Wasiirku ayaa go'aamin doona baahida shaqaale ee Waaxda Arrimaha Qaxootiga markuu la tashado Madaxda Wasaaradda.

2. Hawlwadeenada Waaxda Arrimaha Qaxootigu ayaa ka koobnaan doona Saraakiisha la Igmaday iyo hawlwadeeno kale hadba sida Wasiirku u tixgeliyo baahida si ay uga caawiyaan gudashada shaqooyinka Waaxda Arrimaha Qaxootiga

3. Xeerka Shaqada iyo Shaqaalaha Puntland ayaa nidaamin doona magacaabidda iyo qoridda Saraakiisha Igman.

### Qodobka 22-aad

### Yagleelidda Xerooyinka

Wasiirku markuu la tashado golaha wasiirada iyo bulshada deegaanka ayuu wuxuu astayn karaa goobo gaar ah ee gudaha Puntland iyaga u hawlgelaya sida

b) Xarumo diiwaangelin.

t) Xarumo habeen dhax ama soo dhoweyn oo ujeedku yahay inay si ku meelgaar ah gabaad/hoyaatin u siiyaan magangelyo doonka iyo xubnaha qoysaskooda inta codsiyadooda qaxootiga laga habaynayo.

J) Xero Qaxooti oo lagu yagleelay si waafaqsan heerbeegyada caalamiga ah dhinacyada amniga, taasoo loonna maarayn doono qaab deegaanka ku haboon.

## Qaybta V: Guddiga Aqoonsiga

### Qodobka 23-aad

### Guddiga Aqoonsiga

1. Waxaa jira guddi la asaasay oo loo yaqaan Guddiga Aqoonsiga.
2. Guddiga Aqoonsiga ayaa caawin doona Agaasimaha arrimaha la xiriira aqoonsiga dadka magangelyo doonka iyo Qaxootiga sida ujeedka Xeerkan.
3. Xubinimda Guddiga Aqoonsiga ayaa ka koobnaan doona:

   b) Agaasimaha Waaxda Arrimaha Qaxootiga ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha

   t) Xubin ka timid Wasaaradda Amniga (Qaybta Dembi Baarista)

   j) Xubin ka timid Wasaaradda Caddaaladda

   x) Xubin ka timid Waaxda Socdaalka Puntland

   kh)Xubin ka timid Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud;
4. Agaasimaha Waaxda Arrimaha Qaxootiga ayaa guddoominaya shirarka Guddiga Aqoonsiga.
5. Xubnaha Guddiga Aqoonsiga waa inay haystaan waayo-aragnimada ku haboon iyo ku xeel dheeraan.
6. Guddiga Aqoonsiga ayaa yeelan doona xeer-hoosaadyo u gooni ah si ay gutaan waajibaadkooda shaqo.
7. Guddoomiyaha Guddiga Aqoonsiga ayaa hubin doona wakiilnimo dumar xilliga shirarkooda iyo hawlsocodka Guddiga Aqoonsiga.
8. UNHCR ayaa lahaan doonta door korjoogtayn arrimaha la xiriira aqoonsiga iyo ilaalinta Qaxootiga, waxaa middani ku jiri doona:

   b) Is dhaafsiga xogta iyo xogaha tirokoobta ay la yeeshaan Guddiga Aqoonsiga ee ku aadan xaaladda qaxootiga ee Puntland

t) Ku talo siinta Guddiga Aqoonsiga hirgelinta heshiisyada caalamiga ee qaxootiga ku haboon, iyo xeer, nidaam iyo go'aan walba oo la xiriira qaxootiga, iyo

j) ka soo qaybgalka shirarka Guddiga Aqoonsiga goobjooge ahaan

## Qodobka 24-aad

## Shaqooyinka Guddiga Aqoonsiga

Shaqooyinka Guddigu ayaa noqonaya sida soo socota:

b) Inay ka baaraan degaan, dibu-eegisna ku sameeyaan dhamaan xaaladaha magangelyada iyo qaxootiga islamarkaana ay talo bixin siiyaan Waaxda Arrimaha Qaxootiga;

i. bixinta meekhaanka magangelyo iyo qaxooti

ii. diidmo meekhanka magangelyo doonka

t) Tixgeliyo oggolaanshaha talo-bixinta go'aan ka gaarista meekhaanka qaxooti kasta.

j) Soo jeediyaan kiisaska khatarta ah ee u baahan dibudejin;

x) Ku talo siiyaan Wasiirka ama Agaasimaha arrintii kasta oo midkood ama labadooduba u soo leexiyaan.

## Qaybta VI: Guddiga Racfaanka

## Qodobka 25-aad

## Yagleelidda Guddiga Racfaanka

1. Waxaa la yagleeli doonaa Guddiga Racfaan, kaasoo eegi doona isla markaana go'aan ka gaari doona racfaanka ka imanaya falalka iyo go'aanada sida waafaqsan Xeerkan.

2. Guddiga Racfaanka wuxuu yeelanaya shaqooyinka soo socda: -

   b) Inay qabtaan racfaanada ka dhasha amar wasiir ama mid Guddiga Aqoonsiga iyadoo lagu hawlgelayo Qaybta III ee Xeerkan.

   t) xaqiijin, kala wareejiyaan, ama ka beddel qaataan go'aanadeeda.

   j) Dib ugu celiyaan (u soo leexiyaan) Agaasimaha arrimo si qiimayn dambe loogu sameeyo si waafaqsan Qaybta III.

3. Ka hor intaysan gaarin go'aanka u dambeeya, Guddiga Racfaanku ayaa:-

   b) ugu celin kara arrinta dhanka Agaasimaha si uu dibu-tixgelin ugu sameeyo;

   t) raadsan kara weydiimo ama baaritaan dheeraad ah oo lagu sameeyo arrimaha haddii loo baahdo;

   j) Sameeyaan fartoomid (amar) kale oo kumeel gaar ah haddii loo baahdo.

## Qodobka 26-aad

## Xubinnimada iyo Muddada Xafiiska

1. Guddiga Racfaanka ayaa ka kooban xubnahan soo socda:

   b) Guddoomiye uu magacaabi doono Wasiirku oo leh aqoon la xiriirta shuruucda iyo waayo-aragnimo aan ka yarayn 10 sano.

   t) Afar xubnood oo kale oo uu Wasiirku ka soo magacaabi doono cid aqoon u leh, ama khibrad:-

   i. Arrimaha Qaxootiga

   ii. Arrimaha haweenka iyo carruurta

   iii. Arrimaha amniga qaranka

   iv. Xalinta khilaafaadka.

2. Dhamaan magacaabista Guddiga Racfaanka waxaa samaynaya Wasiirka isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah. Dhamaan dadka la magacaabay waxay adeegi doonaan muddo afar sano ah oo hal mar loo cusboonaysiin karo muddo xileed kama dambays ah oo dhan afar sano.

3. Ka sokow jago kasta oo ka bannaan xubnaha Guddiga Racfaanka, sida ugu wanaagsan ayaa loo magacaabi doona.

## Qodobka 27-aad

## Jago ka Bannaan Xafiis Xubin

1. Xafiiska xubin Guddiga Racfaanka ayaa noqonaya mid bannaan haddii xubintu:

   b) Ay gaartay da'da shaqo ka fariisadka.

   t) Shaqada iskaga tagto (is-casisho) iyadoo qoraal ku wargelinaysa Wasiirka.

   j) Aan kasoo qaybgelin shirarka iyadoo uusan jirin qoraal oggolaansho maqnaan saddex shir oo isdabjooga ee guddiga.

   x) Aan awoodin inay shaqooyinkeeda gudato sababo dhimir ama naafo xubneheeda ku timid awgood, uuna qoraal ahaan uga marag kacay dhaqtar marag-aqooneed haysta.

   Kh)Ay ku caddaatay fal denbiyeed uu ku mutaysan karo ciqaab xabsi.

   d) Lagu xukumay inuu musalifey.

   r) Si intaas ka duwan ma awoodi karo ama kuma haboona inuu guto waajibaadkiisa.

   s) Geeriyooto.

2. Jagadii kasta oo xubnaha ka bannaan waxaa loo buuxin doonaa si waafaqsan qodobada Xeerkan.

3. Xubnuhu shirkooda u horreeya waxay ku dooran doonaan guddoomiye iyo guddoomiye ku-xigeen.

### Qodobka 28-aad

### Shirarka, tirada ansaxa, iyo go'aamada

1. Guddiga Racfaanka ayaa qabandoona shirar haddii loo baahdo si ay gutaan shaqooyinkooda lasoo hoosgeliyey Xeerkan.
2. Ka sokow qodobka sare Guddiga Racfaanka waxay ugu yaraan qaban karaan shirar saddex biloodle ah.
3. Xubnaha tiro- badanta (majority) ah ee xilligaas xafiiska jooga oo ah xubnaha Guddiga Racfaanka ayaa noqonayaa tirada ansaxa (guntamida) ee shirku ku furmi karo.
4. Go'aanka Guddiga Racfaanka ayaa lagu dhisi doonaa meeshay u badato codaynta xubnaha jooga. Meeshay codka xubnaha jooga ay u kala jabaan oo labo meelood isle'eg, shirgudoonka ayaa yeelanay codka go'aaminaya.

### Qodobka 29-aad

### Xeerar Hoosaadka Guddiga

Marka laga reebo waxa xeerku si cad u sheegay, Guddigu iyagaa u nidaamin doona ambaqaadkooda hadba siday habooni u arkaan.

## Qaybta VII: Xuquuqda iyo Waajibaadka Qaxootiga

### Qodobka 30-aad

### Xuquuqda Guud iyo Ballamo-fulinta Qaxootiga

1. Sida Xeerkani qabo, Qaxooti kasta iyo xubin walba oo qoyskiisa ah:

   b) waxay daw u yeelan doonaan xuquuqda isla markaasna u hogaansami doonaan ballamo fulinta ku cad axdiyada caalamiga ah oo Soomaaliya saxiixay, haddana

   t) waxay daw u leeyihiin waraaqaha haybta ee lagu tilmaamay qodob hoosaadka 31 (1), iyo

   j) waxay xaq u leeyihiin inay helaan waraaqo safar markay codsadaan sida lagu xusay xeer hoosaadka 31(2), iyo

   x) waxay daw u leeyihiin inay codsadaan noocyo kale waraaqo madani ah sida Xeerka quseeya qeexayo, iyo

   kh) waxay u hogaansamayaan dastuurka Puntland, iyo

   d) waa inay dhowraan xeerarka iyo nidaamyada dhaqangalka ka ah gudaha Puntland iyo tallaabooyinka la qaatay si loo meel mariyo amniga guud ahaan. Waa inuusan dhexgelin (ku jirin) falal lidi ku ah danaha Puntland.

2. Qofna lagulama kici doono xarig ama hayn ku meelgaar ah. Qofna lagama qaadi doono madaxbannaanidiisa (xorriyaddiisa) marka laga reebo sababaha iyo sida waafaqsan hannaanada uu jideeyey Xeer.

3. Haddii uu Qaxootigu awoodi waayo qareen sharci, Dowladda Puntland ayaa u soo magacaabi doonta qareen qof walba oo Qaxooti ah oo lagu soo eedeeyo arrimo denbi la xiriira ama uu qabanayo codsi amar oo soo hoos gelaya Qodobka 8aad ee Xeerkan.

## Qodobka 31-aad

## Xaashida Aqoonsi Sugidda

1. Qaxooti ama Magangelyo-doone walba oo hortaga Waaxda Arrimaha Qaxootiga sida waafaqsan Qodobka 9 waxaa:-

   b) loo soo saari doonaa Xaashida Aqoonsi Sugidda oo loo dejiyey foom.

   t) loo oggolaan doonaa inuu joogo ama si madax bannaan ugu dhex socdo Puntland oo dhan taasoo la saari karo xannibaad uu soo rogi karo Wasiirku.

   j) waxaa kale oo loo oggolaan doonaa inuu Puntland ku dhex noolaado ilaa sababaha uu kasoo qaxay ay meesha ka baxayaan.

2. Qofka Qaxootiga ah waa loo soo saari karaa waraaqo safar sida waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobey ee la xiriira meekhaanka Qaxootiga iyo Lifaaqyada kujira, sabab la xiriirta inuu u safro meel ka baxsan Puntland, marka laga reebo in asbaabo dirqinaya ee amniga qaranka ama kala dambaynta guud ay waxka duwan u baahan yihiin.

3. Qaxootigu waxay kaloo codsan karaan waraaqo rayid sida lagu qeexay xeerka quseeya.

## Qodobka 32-aad

## Shaqaalayn

Qof kasta oo Qaxooti ah ama xubin ka mid ah qoyskiisa waxay marka la eego shaqaalaynta kasab doonka ah, waxaa loo dabakhayaa si lamid ah xanibaadaha lagu soo rogo shisheeyaha.

## Qodobka 33-aad

## Waxbarasho

Xukuumada Puntland waxay fidin doontaa waxbarasho carruurta qaxootiga ah tab la mid ah sida guud ahaan shisheeyaha kale loogu deeqo.

## Qodobka 34-aad

## Dardaaran

1. Marka geeri, furniin, kala qeybin, ama maxbuusid ku timaado Qaxootiga, qof kasta oo toos ka hor geeridaas, kalatagaaas, kala qeybintaas ama maxbuusidaas u joogey gudaha Puntland isagoo ah kutiirsane ama xubin ka mid qoyska qaxootigaas waxaa loo oggolaan doonaa inay kusii negaadaan Puntland gudaheeda.

2. Ka sokow qodobka sare Kutiirsane kasta ama Xubin qoys ee Qaxootiga waxay soo codsan kartaa meekhaan qaxootinimo sida lagu tilmaamay Xeerkan.

## Qodobka 35-aad

### Xalka-waara

1. Qaxooti kasta wuxuu xaq u leeyahay, iyadoo rabitaankiisa ku xiran, inuu raadiyo isagoo ka tegaya Putland ku noqoshada dalkiisa jinsiyadda ama deegaankiisii caadiga ahaa ee hore si ay ku dheehan tahay sharaf iyo bedqab.

2. Go'aan iskii ah oo dib u noqosho oo uu qaato qof Qaxooti ahi waxaa loo arkayaa go'aan ka dhexeeya dhamaan xubnaha qoyskiisa ee la socda, marka laga reebo meeshay u muuqato in xubin ama xubno ka mid ah qoyskaas, laga yaabo markay dib ugu noqdaan dalkooda jinsiyadda ama degaankiisa hore ee caadiga ahaa, in la dhibaateeyo ama halis lagu geliyo sababaha lagu xusay Qodobka 3.

3. Meeshay habboonaato, Waaxda Arrimaha Qaxootigu waxay fududayn doontaa weelaynta iyo jinsiyad siinta qaxootiga. Weelaynta iyo jinsiyadsiintu qaxootigu waa go'aan ku xiran Wasiirka, kaasoo uu samayn karo isagoo la tashanaya lataliye sharci iyo Barlamaanka.

# Qaybta VIII: Goosgoos

## Qodobka 36-aad

### Meelkadhacyada/Denbiyo

1. Qof kasta kaa soo

   b) Puntland ugu sugan si ka soo horjeedda qodobada Xeerkan dhaqangalka ah

   t) Hawraaro ama weero been abuur ah si kutalgal ah ugu sheega Sarkaalka la Igmaday; ama

   j) Si ogaan ah u marin habaabiya Sarkaal walba oo la Igmaday oo doonaya xog muhiim u ah fulinta iyo waajibaadka shaqo ee uu siiyey Xeerkan; ama

   x) Iyadoo ay ugu wacan tahay amar uu soo saaray Wasiirku, qof ka tegey ama laga saaray Putland, ha yeeshee qofkaas laga helay gudaha Puntland iyadoo amarkii uu weli taagan yahay; ama

   kh) Aan ahayn Qaxooti, ama haysan Xaashida Aqoonsi Sugidda ansaxa ah ee sharciyeysa Qaxootinimadiisa ama Magangelyo-doonimadiisa, ka gaabiyey in uu u hoggaansamo amarka Wasiirka; ama

   d) Degan oggolaansho la'aan meelo ka baxsan goobihii loo asteeyey sida lagu tilmamay Qoddobka 37 ee Xeerkan,

   Wuu ku xad gudbay Xeerkan.

2. Mid kastoo ka horyimaada hawraarta qodob hoosaadka 36 (1), ama Qodob kastoo kale, ama midkii kasta si ka duwan uga horyimaada hirgelinta Xeerkan, wuxuu jebiyey Xeerkan wuxuuna mutaysan doonaa ciqaab sida waaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 37-aad

## Nidaamyada

Wasiirku ayaa si guud ahaaneed u samayn kara nidaamyo (habraacyo) keeni kara in si kasii wanaagsan qodobada Xeerkan loo fuliyo.

## Qodobka 38-aad
## Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imaanya ama la socon Karin Xeerkan.

## Qodobka 39-ad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa Marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**